

SOMALI

Su'aalada Mararka qaarkood lays Weydiiyo oo ku Saabsan Qalinjabin Looga Baahan Yahay Ardayda

- (1) Haddii ardayga oo isku dayaayo in oo helo diblooma ama shahaadada - taas micnaheed waxay tahay waa in oo ku guulaystaa imtixaanka WASL ama maadooyin kastoo dadban oo la ansixiyey, laakiin xisaabta waa in la sii wadaa qaadashada maadooyinka xisaabta si aad u qalinjabiso – Waa maxay heerka maadooyinka xisaabta aan qaadanaayo?**

Maadooyinka fasalada waa in ay u dhigmaan heerka 9th iyo 10th fasalada GLEs. Waxaana ka mid ah sida xisaabta Integrated Math I iyo II, Applied Math II iyo III, iyo Pathways math.

- (2) Miyaa ubadka looga baahan yahay in oo ugu guulaysto maadooyinka xisaabta mid ka sareeyso cel-celiska fasalka?**

Maya. Ardayda waxaa looga baahan yahay oo kaliyah “ku guulaysto” maadooyinka, ma looga baahno in ay ku guulaystaan dhibcaha A ama B (ama xataa C). Haddii ardayga oo keeno xisaabta dhibcaha “D” ardayga miyuu ku guulaystay xisaabta, la-taliyaasha shaqaalaha la shaqeeyo ubadka ayaa qiimeynaayo haddii ardayda u baahan yihiin maadooyinka xisaab kale si loo hubiyo xirfada horumarka, tusaale, haddii ardayda ay helaano “D” xisaabta Integrated Math II, waxaa laga rabaa in ay qaataan xisaabta Applied Math II si ay ugu gudbaan maadada xisaabta Integrated Math III.

- (3) Waa maxay ardayda ELL, weli miyee qaadanayaa imtixaanka WASL si ay u qalinjabiyaan?**

Sharci-dejiyaasha Gobolka waxay qorshayeen bayaan looga reebaayo ardayda ELL aanan ku guulaysan imtixaanka Washington Language Proficiency Test oona qaadanaayo imtixaanka WASL, laakiin waxaa diiday Gudoomiyaha Gobolka. Waqtigaan, Ardayda ELL waxaa laga rabaa oo looga baahan yahay in ay ku guulaystaa qaabka hadda jiro waxbarashada guud ardayda, kana mid ah ku guulaysiga imtixaanka WASL ama qaabka badalka dadban oo la ansixiyey.

- (4) Maxay loo tixgalinayaa ardayda ka soo guurto gobolo kale?**

Ardayda ku soo guulaysatay imtixaanka NCLB gobolo kale, lehna dhico guulaysasho ah ma loo baahno in ay qaataan imtixaanka WASL. Waxay helayaan dibloomada, mana helayaan CAA ama CIA.

- (5) Isku-daridka Mashruuca oo looga baahan yahay gobolka, maka tanaasuli karaa maamulaha dugsiga?**

Maya, in kastoo ay jiraano kooxyo SIT ama IEP waxay dooran karaa in ay qeexaano dib-u-habeeynta mashruuca ardayda cuuryaanka ah.

- (6) Maxay tahay ardayda dhiganaayo Running Start? Miyuu qaadan karaa maadada English 101 ama 102 in oo ku badasho si oo u dhameeystiro Isku-daridka Mashruuca?**

Maya. Maamulka dugsiga wuxuu dooran karaa in oo u ogolaado ardayda dhiganeeyso Running Start in ay dhiibaan soo buuxitaanka dhameeystirka warqada maadada English 101 iyo 102 oo ah qayb ka mid ah Isku-darida Mashruuca, laakiin qaadashada maadooyinka malagu badali karo soo dhameeystirka Isku-darida Mashruuca. Tusaale, haddii dugsiga oo leeyahay mashruuca looga baahan yahay difaacida, ardayda waxay u soo bandhigi karaan waraaqadaha tijaabooyinka gudiga, maamulka dugsiga waa in oo ogolaado ardayda Running Start in ay soo bandhigaan waraaqadaha fasalada waraaqadaha tijaabooyinka, laakiin ardayga waxaa looga baahan yahay in oo soo hor-istaago gudiga.